

## Seizures First Aid (Somali)

## Gargaarka degdega ah ee suuxdinta

Suuxdinta, qalalka ama gariirka (gariirka aan la xakamayn karin) ee carruurta waxaa sababi kara qandho, dhaawacyo madaxa ah, neerfayaalka maskaxda oo jahwareer ku yimaaada iyo xaalado kale.



## Calaamadaha suuxdinta



Jahwareer



Gacmaha iyo lugaha oo adayg noqda ama gariira



Miyir beelid (korontada oo qofka ka tagta)



Indhaha oo dib u rogmada Madaxa oo gadaal u ceshooma



Neefsashada oo dhib kugu ah

**Wac lambarka Seddexda Ebar (000) isla markay suuxdintu bilaabato.**

## Daryeelka xilliga suuxdinta



## Samee

- u dhaqaaji ilmahaaga meel nabdoon oo sagxadda/dhulka ah kana qaad wax kasta oo mudac ah oo laga yaabo inay dhaawacaan
- la joog ilmahaaga
- qor wakhtiga ay suuxdintu bilaabatay iyo waxa ku dhacaya ilmahaaga inta lagu jiro suuxdinta si aad ugu sheegto kalkaaliyeyaasha ambalaasta iyo dhakhaatiirta.



## Ha samayn

- inaad qabatid ama celcelisid ilmahaaga
- faraha kaqaad ilmahaaga
- inaad afka wax u gelisid ilmahaaga
- inaad ilmahaaga siisid cunto ama wax cabitaan ah.

## Isla markay suuxdinta dhacdo ka dib

- U seexi ilmahaaga dhinacdhinac
- Si deggan ula hadal ilmahaaga ilaa ay si buuxda usoo kabsanayaan, ama gargaar kaaga imanayso.

Waxaad wax badan oo ku saabsan daryeelka ilmaha ay suuxdintu ku dhacdo ka baran kartaa koorsada gargaarka degdega ah (first aid course).

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmadka Degdega ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha. **Resource ID:** FS212 **Reviewed:** July 2022 **Cudur daar:** Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ujeedaduna tahay tilmaamis kaliya waxaana loogu talagalay inay taageerto, laakiin aysan beddelin, wada hadalka dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacaysa noqulkaa ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.

